Wasaaradda Caafimaadka | Wasaaradda Waxbarashada

Ontario

Baaritaanka daryeelka carruurta iyo iskuulka ee COVID-19

Nuqulka 5aad: Maayo 31, 2021

Ardayda iyo caruurta waa in laga baaraa cudurka COVID-19 maalin kasta ka hor inta aysan aadin iskuulka ama xarunta daryeelka carruurta. Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa midkaan buuxin kara iyaga oo ka wakiil ah carruurta.

Taariikhda (bb-mm-ssss) _____

Su'aalaha Baaritaanka

1. **14 kii maalmood ee la soo dhaafay, miyuu ardayga/cunugga u safray dibedda ama meel ka baxsan dalka Kanada?** ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii laga dhaafay shuruudaha karantiilka ee dowladda federaalka, dooro "Maya."

2. **Dhakhtarkaaga, bixiyaha daryeelka caafimaadka, ama qaybta caafimaadka dadweynaha miyay kuu sheegeen in ardayga/cunugga uu hadda iskarantiilay (guriga joogo)?** ☐ Haa ☐ Maya
   Tani ayaa sabab u noqon karta dillaaca cudurka ama raadraaca xiriirka.

3. **14 kii maalmood ee la soo dhaafay, ardayga/cunugga ma loo aqoonsaday inuu "xiriirka dhow" la yeeshay qof hadda qaba cudurka COVID-19?** ☐ Haa ☐ Maya

4. **14 kii maalmood ee la soo dhaafay, ardayga/cunugga ma ku helay telefoonkiisa gacanta ogeysiiska Digniinta COVID in uu wajahay?** ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii ay horey u aadeen baaritaan oo ayna heleen natiijo waa laga waayay ah, dooro "Maya."

5. **Ardayga/cunugga hadda miyuu dareemayaa wax ka mid ah astaamahan cudurka?**
   Dooro mid kasta/dhammaan kuwa cusub, ka sii daraaya, oo aanan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee ay horey u qabeen.

Qandho iyo/ama qarqaryo ☐ Haa ☐ Maya
Heerkul gaaraya 37.8 digriis Selshiyas/100 digriis Fahrenhet ama ka badan

---

Qufac ama qufac lala dhawaaqo (xiiq leh) ☐ Haa ☐ Maya
Joogto ah, ka badan sida caadiga ah, sameeya qaylo xiiqlayn marka la neefsanayo (aanan la xiriirin cudurka neefta, falcelinta hawo-mareennada caabuq ka-dib, ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen)

Neef-qaadashada oo qofka ku yaraato ☐ Haa ☐ Maya
Neefta oo qofka dhib ku noqota, aan a woodin in uu si qoto-dheer u neefsado (aanan la xiriirin cudurka neefta ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen)

Yaraanshaha ama luminta dhadhanka ama urta ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xiriirin xasaasiyado xilliyeedda, xannuunada xididada nudayaasha ah, ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen

---

Cune xannuun ama liqidda oo qofka ku adkaata ☐ Haa ☐ Maya
Wax liqid xannuun badan (oo aanan la xiriirin xasaasiyado xilliyeed, laab-jeex, ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen)

San diif ka socda ama cufan/cabbursan ☐ Haa ☐ Maya
Oo aanan la xiriirin xasaasiyado xilliyeed, joogidda bannaanka xilliyada cimilo-gooreeddu ay qaboow tahay ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen

---

Madax-xannuun
Aan caadi ahayn, muddo jira (oo aanan la xiriirin madax-xannuunada nooca-walaaca, madax-xannuun daran, ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen)

☐ Haa ☐ Maya

Haddii ardayga/cunugga uu qaatay tallaalka COVID-19 48 dii saacadood ee la soo dhaafay oo uuna dareemayo madax-xannuun yar oo keliya ku billoowday tallaalka ka-dib, dooro "Maya."

Lallabbo, matag iyo/ama shuban
Aan la xiriirin xanuunka calool hurka, walaac, calool majiirka caadada, ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen

☐ Haa ☐ Maya

Daal xad-dhaaf ah ama muruq xanuun
Aan caadi ahayn, dhacsaal, tamar la'aan, quudashada carruurta yaryar oo liidata (aan la xiriirin niyad-jabka, hurdo la'aan, qanjirka tayroodka oo aan shaqeyn, dhaawac lama filaan ah, ama sababo ama xaalado kale oo la ogyahay in ay sababaan oo ay horey u qabeen)

☐ Haa ☐ Maya

Haddii ardayga/cunugga uu qaatay tallaalka COVID-19 48-kii saacadood ee la soo dhaafay oo uuna dareemayo daal yar iyo/ama muruq xannuun yar/isgoysyo xannuun oo keliya ku bilowday tallaalka ka-dib, dooro "Maya."

---

6. **Ma jiraa qof ardayga/cunugga uu la nool yahay oo hadda dareemaya wax ka mid ah astaamaha cudurka COVID-19 oo cusub iyo/ama sugaya natiijooyinka baaritaanka ka-dib marka uu dareemo astaamaha?**
   Haddii shakhsigu dareemaayo astaamaha cudurka uu qaatay tallaalka COVID-19 48 dii saacadood ee la soo dhaafay oo uuna dareemaayo madax-xannuun yar, daal, murqo xannuun, iyo/ama isgoysyo xannuun oo keliya ku billoowday tallaalka ka-dib, dooro "Maya."

☐ Haa☐ Maya

Natiijooyinka su'aalaha baaritaanka

Haddii aad "HAA" ugu jawaabtay su'aasha 1 aad ama 3 aad ha tagin iskuulka ama xarunta daryeelka carruurta.

- Ardayga/cunugga waa in uu is keliyeeyo (guriga joogaa) muddo 14 maalmood ah oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- Haddii aad **"HAA" ugu jawaabtay su'aasha 1 aad**, raac talo-bixinta caafimaadka dadweynaha. Ardayga/cunugga ayaa dib ugu noqon kara iskuulka/daryeelka caruurta ka-dib marka ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha.
- Haddii aad **"HAA" ugu jawaabtay su'aasha 3 aad**, la hadal dhakhtarka/bixiyaha daryeel caafimaad si aad u hesho talo-bixin ama qiimayn, oo ay ku jiraan haddii ay u baahan yihiin baaritaanka COVID-19. Ardayga/cunugga ayaa wuxuu dib ugu noqon karaa iskuulka/daryeelka carruurta 14 maalmood ka-dib, xitaa haddii ay helaan natiijo baaritaan oo waa laga waayay ah.
  - Haddii aad ku nooshahay meelo gaar ah oo gobolka ka mid ah, sida Toronto ama Peel, cunugga walaalahiisa iyo dad kale ee gurigaaga ku nool waa in ay guriga joogaan muddo 14 maalmood ah. Tani waxaa sabab u ah arrimaha la xariira halista ee degaanka.
  - Haddii aad ku nooshahay meelo kale oo gobolka Ontario ah, walaalaha iyo dadka kale ee gurigaaga waxay aadi karaan iskuulka, daryeelka carruurta ama shaqo, balse waa in aysan guriga uga bixin sababo kale oo aan aasaasi ahayn.
    Weyddii iskuulkaaga/daryeelka caruurta macluumaad dheeraad ah.
- Haddii ay astaamaha cudurku yeeshaan ama laga helo cudurka, la xiriir qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga ama dhakhtarkaaga/bixiyaha daryeelkaaga caafimaad si aad uga hesho talo-bixin dheeraad ah.
- La xiriir iskuulkaaga/bixiyaha daryeelka carruurta si ay u ogaadaan natiijadaan.

Haddii aad "HAA" ku jawaabto su'aasha 2 aad ha aadin iskuulka ama daryeelka caruurta.

- Ardayga/cunugga waa in uu keliyeeyo (guriga joogaa) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo xaaladaha degdegga ah.
- Raac talo-bixinta caafimaadka dadweynaha. Ardayga/cunugga ayaa dib ugu noqon kara iskuulka/daryeelka caruurta ka-dib marka ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha.
- Haddii ay astaamaha cudurku yeeshaan, la xiriir qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga ama dhakhtarkaaga/bixiyaha daryeelka caafimaad si aad uga hesho talo-bixin dheeraad ah.
- Haddii aad ku nooshahay meelo gaar ah oo gobolka ka mid ah, sida Toronto ama Peel, cunugga walaalahiisa iyo dad kale ee gurigaaga ku nool waa in ay guriga joogaan. Tani waxaa sabab u ah arrimaha la xariira halista ee degaanka.

- Haddii aad ku nooshahay meelo kale oo gobolka Ontario ah, walaalaha iyo dadka kale ee gurigaaga waxay aadi karaan iskuulka, daryeelka carruurta ama shaqo, balse waa in aysan guriga uga bixin sababo kale oo aan aasaasi ahayn. Weyddii iskuulkaaga/daryeelka caruurta macluumaad dheeraad ah.
- La xiriir iskuulkaaga/bixiyaha daryeelka caruurta si ay u oggaadaan natiijadaan.

Haddii aad "HAA" ku jawaabto su'aasha 4 aad ha aadin iskuulka ama daryeelka carruurta.

- Ardayga/cunugga waa in uu keliyeeyo (guriga joogaa) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo xaaladaha degdegga ah.
- Booqo xarun qiimayn si aad ugu hesho baaritaanka COVID-19.
  - Haddii cudurka laga waayo (fayrasku aysan qabin), waxaa ay dib ugu noqon karaan iskuulka/daryeelka caruurta.
  - Haddii cudurka laga helo (ay qabaan fayraska), waxaa ay dib u noqon karaan oo keliya ka-dib marka ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha.
- Haddii ay astaamaha cudurku yeeshaan, la xiriir qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga ama dhakhtarkaaga/bixiyaha daryeelka caafimaad si aad uga hesho talo-bixin dheeraad ah.
- Caruurta walaalaha ah ama dadka kale ee gurigaaga jooga waxay aadi karaan iskuulka, daryeelka carruurta ama shaqada, blasé waa in aysan guriga uga tagin sababo kale oo aanan aasaasi ahayn ilaa shakhsiga helay digniinta COVID ee cudurka waa laga waayay ah, ama ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga guriga.
- La xiriir iskuulkaaga/bixiyaha adeegga daryeelka caruurta si aad u ogeysiiso natiijadaan

Haddii aad "HAA" ku jawaabto wax ka mid ah astaamaha ku jiro su'aasha 5 aad ama su'aasha 6 aad ha aaddin iskuulka ama daryeelka caruurta.

- Ardayga/cunugga waa in uu iskarantiilo (guriga joogo) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- Haddii aad **"HAA" ugu jawaabtay su'aasha 5 aad**, la hadal dhakhtar/bixiyaha daryeel caafimaad si aad u hesho talo-bixin ama qiimeyn, oo ay ku jiraan haddii ardayga/cunugga uu u baahan yahay baaritaanka COVID-19.
- Haddii aad **"HAA" ku jawaabtay su'aasha 6 aad**, ardayga/cunugga ayaa wuxuu ku noqon karaa iskuulka ama daryeelka carruurta ka-dib marka shakhsiga uu helo natiijada baaritaanka COVID-19 oo waa laga waayay ah, ama ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaanka, ama laga helo cudur kale.
- Carruurta walaalaha ah ama dadka kale ee gurigaaga jooga waa in ay guriga joogaan ilaa ardayga/cunugga muujinaya astaamaha ama shakhsiga looga waayo cudurka, ama ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha, ama laga helo cudur kale.
- La xiriir iskuulkaaga/bixiyaha daryeelka caruurta si ay u ogaadaan natiijadaan.

Haddii aad "MAYA" ugu jawaabto su'aalaha oo dhan, cunugaagu wuxuu aaddi karaa iskuulka/daryeelka carruurta sababta oo ah waxay u muuqdaan in ay caafimaad qabaan ama in aysan wajahin cudurka COVID-19. Raac hannaanka u degsan iskuulkaaga/bixiyahaaga daryeelka caruurta ee loogu talagalay in shaqaalaha la ogeysiiyo natiijadaan (haddii la adeegsan karo).

Haddii ardayga/cunugga uu qaatay tallaalka COVID-19 intii lagu jiray 48 da saacadood ee la soo dhaafay oo uuna dareemayo madax-xannuun yar, daal, murqo xannuun, iyo/ama isgoysyo xanuun oo keliya ku bilowday tallaalka ka-dib, oo aysanna jirin astaamo kale, waa in ay xirtaan af-xir habboon oo le'eg waqtiga ay iskuulka/xarunta daryeelka guriga ay joogaan oo dhan. Waxaa ay af-xirka iska bixin karaan oo keliya marka ay cunto cunayaan ama cabbitaan cabbayaan waana in ay ugu yaraan laba mitir ka fogaadaan dadka kale markay af-xirka iska bixiyaan. Haddii astaamuhu ay ka sii daraan, sii wad 48 saacadood ka-dib, ama haddii ay yeeshaan astaamo kale, waa in ay si degdeg ah uga tagaan iskuulka/xarunta daryeelka carruurta si ay isku karantiilaan ama isu-keliyeeyaan waana in ay raadsadaan baaritaanka COVID-19.

Caafimaadka Dadweynaha ee Ontario – Raadraaca Xiriirka

Ka jawaabidda su'aalahan waa ikhtiyaari. Macluumaadkan waxaa keliya adeegsanaya saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha iyaga oo u adeegsanaya raacraaca xiriirka. Macluumaadka oo dhan waxaa lagu tirtiri doonnaa muddo 28 maalmood gudahooda ah.

Taariikhda: _____

Magaca: _____

Telefoonka ama Email-ka: _____